



Barnaamijka Edlevo ee waalidiinta

Si aad u adeegsato barnaamijka Edlevo, ka Waalid ahaan waxaad u baahan tahay inaad soo dejiso Edlevo. App-ka waa bilaash waxaana lagu soo dejisan karaa taleefanka gacanta ama tablet-ka adiga oo isticmaalaya App Store ama Google Play. Waxed ku soo gashaa BankID. Waxa sidoo kale jira bogga internetka oo u dhigma adeega app-ka Edlevo haddii aad doonayso inaad ka soo gasho bogga internetka, waxaad booqataa www.kristianstad.se/edlevo linkigaan ayaa laga heli karaa adeegyada elektaroonigga ah.

Ma tahay qof masuul ah, waalid xannaaneyaa carruurta ama guriga lagu daryeelo caruuurta oo doonaya in uu adeegsado aaladaha dugsiga, waa inaad la xiriirtaa shaqaalahaa dugsiga barbaarinta ama iskuulka. Waxay kaa caawinayaan sidi aad u adeegsan lahayd adiga oo isticmaalahaya BankID.

Marka ilmahaagu gaadho 18 sano, kuma arki doontid ilmahaaga app-ka Edlevo.

App-ka Edlevo, waalididku si fudud ayuu ku heli karaa hawlaha muhiimka ah ee khuseeya dugsiga barbaarinta, hooyga xiliga firaaqada/Fritidshem iyo dugsiga. Bogga koowaad wuxuu muujinayaah dhammaan carruurta iyo hawlaha guud. U rog dhanka bidix si aad u arqagto caruuurtaada iyo hawlaha gaar ka ah. Qaybta hoose ee dalabka doorashada ee dhanka midigta sare waxa aad kala dooran kartaa afafka iswiidhishka iyo ingiriiska.

- **Maclummaadka xiriirka**
Dhanka hoose ee xulashada hagaajinta ee dhanka midigta sare, waxaa jira fursad aad ku dooran karto "Itus maclummaadka oo dhamaystiran". Halkan waxaa ka muuqda cinwaankaaga iyadoo lagu salaynayo diiwaanka dadweynaha. Waa muhiim ah in aad ku galiso moobil nambarkaaga iyo iimaylkaaga si aad awood ugu yeelatid in aad hesho maclummaadka qaar ee dugsiyada xannaanada, hoyga xiliga firaaqada/Fritidshem iyo dugsiyada ay soo diraan.
- **Diiwaangelinta maqnaanshaha**
Adeegu uma shaqaynayo ardayda inta lagu guda jiro fasaxa xagaaga sababta oo ah majirto meelayn fasal.
- **Fariimaha**
Fariimaha ka imaanaya degmada Kristianstad waxa ay imannayaan haddii ardaygu ka maqnaado dugsiga maqnaasho aan laga warqabin, hadii aadan soo gudbin jadwalka caruuurta ama maclummaadka ku saabsan diiwaangelinta qorshaynta fasaxa ee dugsiga xannaanada/hoyga xilliga firaaqada/Fritidshem. Diritaanka fariintu uma sahlana dugsiga sidaas owgeed waxaa lagu talinayaan in la booqdo adeega Unikum.

Dugsiga xannaanada iyo hoyga xiliga firaaqada/Fritidshem

Waalidka carruurtu u dhigato dugsiga xannaanada iyo hoyga xiliga firaaqada waxa ay heli karaan in ay u soo diraan fariimo shaqaalahaa si eey u arkaan soo xaadirida guud. Habka fariimaha, guji calaamadda ku darta ah ee ka hooseysa warbixinada fariimaha/informationsmedelante, calaamadee ama muuji ilmaha ay quseeyso. Gujji badhanka geeska midig ee hoose si aad u qorto fariin oo aad u dirto.



- **Jadwalka dugsiga**

Halkan waxaa ka muuqda jadwalka dugsiga ee ubadkaagu eey dhigtaan. Taariikhda maanta waxaa ku xusan maadada iyo waqtiga cashar kasta. Waad sii gujjin kartaa si aad u aragto maalmo ama toddobaadyo kale (todobaadyada soo socda ama kuwii hore).

- **Jadwalka carruurta/qorshaynta fasaxyada**

Ka eeg macluumaad dheeraad ah www.kristianstad.se/registrerabarnschema

Waalidiintu waa in ay la deggan yihii caruuerta si ay u adeegsadaan app ama hadii waalidku kala dagganyahay laba ciwaan waa in lagu diiwaan geliyaa goob ka dhaxaysa si ay u adeegsadaan. Adreeska waalidka iyo caruurtu daggan yihii waa in uu is lahaadaa. Haddii ay kala duwanyhiin waa in aad kasoo badashaa hay'adda diiwaanka dadwaynaha.

Adeega dhexdiisa, waxa aad diiwaan galin kartaa jadwalkaaga, muuqaalka guud ee jadwalka, qofka soo dooni kara carruurta iyo qorshaynta fasaxa.

- **Xulashada maaddooyinka iyo luqaddaha**

Halkan waxa aad ka diiwaangelin kartaa doorashada luqadda ilmahaagu doonayo marki la gaaro, iyadoo lagu saleynayo doorashooyinka dugsigu soo bandhigo.

- **Manhajka waxbarasahda**

Qofka mas'uulka ka ah caruuerta ayaa arki kara manhajka waxbarashada, ilaa ilmuuhu ka gaaro da'da 18 jir.

- **Afka hooyo**

Halkaan waxa aad ka codsan kartaa barashada afka hooyo ee ilmahaaga. Haddii aad hore u haysatay codsi afka hooyo oo la ansixiyay oo aanad doonayn in aad beddesho, uma baahnid in aad codsi cusub soo gudbiso. Barashada luqadda hooyo waxa uu ardaygu bilaabi karaa laga bilaabo fasalka 1aad.

Adeega elektarooningga ah ee dugsiga barbaarinta iyo hoyga xiliga firaaqada/Fritidshem

Muddo gaaban gudaheed, adeegyada elektarooningga ah waxaa loo wareejin doonaa app-ka Edlevo, laakiin inta ka horreysa adeegyada elektarooningga waxa lagu soo ururiyay bogga degmada Kristianstad www.kristianstad.se/forskola ama www.kristianstad.se/fritidshem

Waxa aad kusoo galaysaa BankID, kadibna waxaa kuu furmaya bog waalidka usoo bandhigaya caruurtiisa iyo adeegyadaan hoos ku xusan.

- Codsiga dugsiga barbaarinta ama hoyga xiliga firaaqada/Fritidshem
- Diiwangelinta dakhliga
- Haa ama maya soo bandhigidda booska xanaanada ama hoyga xiliga firaaqada
- Joojinta dugsiga xanaanada ama hoyga xiliga firaaqada
- Xogta xiriirada kale. Sidoo kale waxaa laga dheehan karaa gudaha adeega app ka Edlevo



Haddii appku shaqayn waayo

Haddii appka Edlevo uu si lama filaan ah u shaqeeyn waayo, uu joojiyo ka jawaabista ama uu furmi waayo, soo-saareyaasha aaladaha iOS iyo Android waxay kusiinayaan talooyin aad isku dayi karto:

- Dami oo dib u shit taleefankaaga gacanta ama tablet
- Cusbooneysii/update taleefankaaga ama tablet-kaaga
- Iska masax appka oo soo dejiso mar labaad
- Ka jooji appka shaqada
- Nadiifi kaydka app ka
- Nadiifi xogta app-ka

Si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan aaladda, tixraac website-ka soo saaraha kaas oo qeexaya sida uu ugu shaqeeyo moobilkaaga ama tablet-kaaga.